Warbixin ay Soo Saartay, Gudiga Baadhista iyo Xaqiiqo Raadinta Dilkii Dr. Maxamed Sirad Dolal, oo Lagu Dilay Ogaden January 17, 2009.

Date: August 5, 2009

Hordhac	I
Kumuu ahaa Maxamed Siraad Dolal	I
Jaha Wareerkii Geerida Keentay in Gudi Baadha la Saaro	II
Xoggaha aan la Ogayn ee aan Baadhida ku Helay	III
Cutubka 1aad	
Khilaafka JWXO	1.0
Iskudaygii Dil ee Ugu Horeeyey	1.1
Shirkii Xalinta Khilaafka Ururka iyo Khiyaanadii Saaxiibadda	1.2
Iskudaygii Dilkii Labaad ee Dr. Dolal	1.3
Cutubka 2aad	
Dilkii Dr. Dolal, Sheegidii Ina Illey iyo Shakigii ka Dhashay	2.0
Kalsooni Daridii iyo Tilmaantii Bogga Internetka Ogaden.com	2.1
Dilka Dr. Dolal ETV, Ka Hore Dalalka Reer Galbeedka Waa Laga Oggaa	2.2
Dabaaldagii Taageerayaalka Maxamed Cumar iyo Daahfurkii Bogga Xaajo.com	
Taariikhda Dr. Dolal Waxaa leh Dalka iyo Dadka Somalida Ogadeeniya	2.3
Maxaay Ciidamada Itobiya Maydka Dr. Dolal u Soo Dhigi Waayeen Magaalooyinka?	2.4
Marin Habaabintii Bogga Ogaden.com	2.5
	2.6
Cutubka 3aad	
Maxaa ka Run ah in Garabka Maxamed Cumar Cismaan ay Dileen Dr. Dolal	3.0
Dr. Dolal Ma Qarinin in Maxamed Cumar Rag uu Xushay Dilayaan	3.1
Galidii Ogadeeniya ee Maxamed Cumar, Waxay Keentay Dilkii Dr. Dolal	3.2
Cutubka 4aad	
Qayladii Dr. Dolal iyo Qaadan Waagii Ummada Somaliyeed	4.0
Yaa Weerarka ku Qaadayey Dr. Dolal	4.1
Dadkii ka Qaybqaatay iyo Sida uu u Dhacay Dilkii Dr. Dolal	4.2
Sidee Booliska Degaanku ku Heleen Qalabka DR. Dolal oo uu ka Maqan Yahay Telefoonki Thuraya [satellite phone]?	4.3
Gabagabo	5.0

Gudiga Baadhista iyo Xaqiiqo Raadinta Dilkii Dr. Maxamed Sirad Dolal

Gudigu waxaa ay ka kooban tahay, xubno Jwxo iyo xubno dadweynaha laga dhex xulay, waxaana la sameeyey kolkii uu bixi waayey raadka dilkii Dr. Dolal, oo ay soo noqnoqdeen arimo aan awal hore laga warhaynin. Itobiya waxay dagaal kula jirtaa ururka Jwxo iyo ururo kale, waxaana gacanta Itobiya iyo kuwa Jabhadahaba sanad walba ku dhinta dadweyne badan.

Dr. Dolal, waxaa uu ka mid ahaa dadweynaha Ogadeeniya ee arimahaas ku dhinta, laakiin waxaa uu ahaa masuuliyiinta ururka Jwxo ugu caansanaa, kuna noolaa dalalka

reer galbeedka. Hadii ay Itobiya disho oo ay maydkiisa soo dhigto magaalooyinka oo ay dadku arkaan, ma jireen wax baadhid ah oo la samayn lahaa waayo cadowgiis ayaa dilay, waxaase timid hashu maankaygii gadaye ma masaar bay liqday.

Sidaas ayeyna ku timid in la sameeyo guddiga baadhista iyo xaqiiqo raadinta dilkii Dr. Maxamed Siraad Dolal.

Yaa Dilay Dr. Maxamed Siraad Dolal!

Hordhac

I. Kumuu ahaa Maxamed Siraad Dolal

Dr. Dolal waxaa uu ahaa aqoon yahan caan ah oo aad looga yaqaano geeska Afrika, caanimada Dr. Dolal kama imanin tacliinta uu lahaa ee waxay ka timid halganka dheer ee uu u soo galay dalkiisa iyo dadkiisa isaga oo huray naftiisa, aqoontiisa iyo awoodiisa oo dhan, kulana dagaalamay gumaysiga Itobiya af, qalin iyo qoriba.

Maxamed Siraad Dolal, wuxuu ku dhashay, ku barbaaray, waxna ku bartay dhulka Somalida Ogadeeniya ee ay Itobiya Gumaysato. Wuxuu waxbarsho sare ku qaatay kana shaqeeeyey Somaliya, waxaa kale oo uu shahaadadda labaad iyo Ph.D ku qaatay dalka Ingriiska.

Halgamaagu waxaa uu wax walba u huray sidii ay ummada Somalida Ogadeeniya ku heli lahayd xaqeeda, wuxuuna cidhiidhi galiyey gumaysiga Itobiya, wuxuuna isu taagay suryo walba oo uu kula diriri karo gumaysiga Itobiya.

Dr. Dolal waxaa uu kula noolaa dalka Ingiriiska hal xaas iyo lix caruur ah oo uu dhalay. Wuxuu ka jeclaa nolosha dabacsan ee reer galbeedka in uu la qaybsado nolosha adag ee haysata dadkiisa.

Nasiib daro Dr. Maxamed Siraad Dolal waxaa si aan la qeexin oo lamo filaan ah uu ugu shahiiday January 17, 2009, meel la yidhaahdo Baarguun oo u dhaw Degmada Dhanaan. Dr. Dolal ma ahayn nin u qalma in uu ku dhinto halka uu ku dhintay. Waayo way adagtahay in si fudud lagu helo ruux buuxiya halka uu u taagnaa halganka ay wado ummada Somalida Ogadeeniya. Geeridu waa lama huraan, waxaase dalka iyo dadkaba u wanaagsanaan lahayd in uu u waaro, si uu ummada xaqeeda u dhiraan dhiriyo, balse Ilaahay baa qadaray in uu ku dhinto halkaas iyo xiligaas. Waxaa xaqiiq ah in hadii ay dawlad ka jiri lahayd dhulka Ogadeeniya in loo samayn lahaa wax lagu xusuusto Dr. Dolal.

II. Jaha Wareerkii Geerida ee Keentay in la Saaro Gudi Baadha

Waxaa calool xumada wayn ah in aan la garanaynin gacanta dishay iyo waliba meesha lagu xabaalay Dr. Maxamed Siraad Dolal.

Dr. Maxamed Siraad Dolal Maalmo ka hor inta aan la dilin waxaa uu u sheegay si aan qarsoodi ahayn, oo caalami ah in la dilayo iyo cida dilaysa. Maalmo yar ka dib waxaa xigay in maydkiisa la soo dhigay Internetka!

Hadaba, su,aasha u baahan in jawaab loo helo ayaa waxay tahay yaa dilay, xageese lagu xabaalay maydkii Dr. Maxamed Siraad Dolal?

January 17, 2009 ayey ahayd Markii ugu horeysay ee la maqlay in la dilay Dr. Dolal, waxaana laga maqlay Telefeshinka Itobiya Barnaamijka afka Somaliga ah oo soo gala 22:30pm habeenimo wakhtiga Itobiya. Waxaa telefeshinka Itobiya xiliga warka Af Somaliga oo ah 22:30pm habeenimo telefoon ku soo gaadhsiiyey Cabdi Maxamed Cumar [Ina Iley] oo ah hogaanka Nabadgaliyada ee Degaanka Somalida, isaga oo kolkaas joogay magaalada Addis Ababa.

Ka dib kolkii uu Telefishinka Itobiya sheegay in la dilay Dr. Dolal, isaga iyo shan nin oo la socotay maydkooduna uu yaalo degmada Dhanaan. Waxaa la soo daristay dadweynaha Somalida Ogadeeniya walwal aad u weyn oo ku saabsan sida loogu kalsoonaan karo hadalka laga siidaayey Telefeshinka cadowga Itobiya.

Waxaa dirbadiiba la is gaadhsiiyey dacalada aduunka geerida Dr. Dolal oo aad looga naxay, waxayna dad badani qaadan waayeen hadalka Cabdi-Iley telefishinka soo gaadhsiiyey arimahan awgood;

- Warka cadowggagu sheego waxaa dhici karta in uusan run noqonin 100%.
- Waxay dadku iswaaydiiyeen wax Ideecadaha looga siidayn waayey, madaama uu telefeeshinku yahay warbaahinta ugu adag uguna war dambaysa.
- Maxaa warka Af Xabashiga looga siidayn waayey, hadii aan wax kale jirin.
- Maxaa warka kolka ugu horaysa looga maqli waayey Degaanka Somalida.
- Maxaa Cabdi-Iley oo Addis Ababa jooga kaliya ogaysiiyey oo isna si deg deg ah telefeeshinka telefoon ugu sheegay [warka oo aan hufanayn].

Arimahan marka la isweydiiyo iyo waliba la,aan war ileedyo kale ayey beeniyeen madaxda ururkii uu hogaamiyaha ka ahaa Dr. Maxamed Siraad Dolal. In kasta oo ay dansanayd isgaadhsiintii uu watay iyo waliba isgaadhsiinta madaxdii kale ee ay wada socdeen.
Subaxnimadii dambe ayey Ideecada BBC-du warysatay mar labaad In Illey waxaa uu sheegay in Maydkii Dr. Dolal uu yaalo Magaalada Godey [Isla maalinkaasna waxaa been noqotay in uu Maydka Dr. Dolal yaalo degmada Godey].

Colaada Itobiya ay u haysay ka sokow, Dr. Dolal, waxaa si xoog leh u necbaa Maxamed Cumar Cismaan iyo raga ay isku bahaystaan siyaasada iyo waliba dadka ku taageera. Dadkan ay ishayeen qaarkood waxay isku hayeen siyaasadda lagu hagayo ururka Onlf, qaarkoodna arimo kale. Hadaba, isagu [waa Dr. Dolal] colaad aan hayn siyaasad dadkan uma hayn, waa sida naloo sheegay. Laakiin ragan ay is-hayeen uguna horeeyo Maxamed Cumar Cismaan, waxay dhawr goor oo hore isku dayeen in ay dilaan.

Si, aan wax uga ogaano heerka ay gaadhsiisnayd colaada loo hayey Dr. Dolal iyo herarka ay soo martay, colaadaas oo markii ugu dambaysay uu ku baxay, ayeynu milicsan sidii ay wax u dhaceen.

III. Xoggaha aan la Ogayn ee aan Baadhida ku Helay

Si,aan u ogaano runta dilkii Dr. Dolal waxaa lagama maarmaan noqotay in aanu baadhid samayno. Baadhitaanka dhexdiisa waxaa lagama maarmaan noqotay in aan helo dadkii uu xidhiidhka la lahaa iyo waliba dadkii ay is-hayeen iyo heerka ay gaadhsiisnayd colaadoodu.
Waxaan helay in dhimashadiisa ka hor ay jireen iskudayo dilal ka horeeyey dilkan aanu baadhayno.

Jabhada Wadniga Xoreynta Ogadeeniya [JWXO] oo la aasaasay Augusto 15, 1984. Dr. Dolal waxaa uu ka mid ahaa aas aasayaashii ururkan. Ururka waxaa markii ugu horeysay ku soo caan baxay shirkii Garbo 1991, wixii intaa ka dambayey waxaa uu ahaa urur tartiib tartiib u soo koraya. Ururka gudoomiyihii u horeeyey ILAHAY ha u Naxriistee waxaa uu ahaa Sheekh Ibraahin Cabdala 1991 – 1998. Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeeniya waxaa ay ku bilaabtay Nidaam Dimoqrati ah [democratic system].

Sanadkii 1998 waxaa ururka gudoomiye loogu doortay General Maxamed Cumar Cismaan. Xiligaas waxaa ay ku beegnay fursado saddex ah oo aad u caawiyey halganka ururka Jwxo oo ahaa;

1. Dagaalkii Eritariya iyo Itobiya sanadkii1998
2. Somaliya oo ay ka hirgashay Nidaam Qabiilo wax lagu qaybsado
3. Dadweyne Badan oo Somalida Ogadeeniya ah oo degay dalalka reer Galbeedka

Saddexdan xaaladood waxay caawisay halganka ay wado Jabahada Wadaniga Xoreynta Ogadeeniya [Jwxo]. Waxaana hal mar uu isbadal ku yimid halganka ay wado Jwxo, oo soo jiitay dad badan oo taageerayaal ah, helayna cudud milatari.

Arintaas oo dad badani ay u qaateen in uu keenay hogaanka ururka. Arintaas waxaa ka soo horjeeday in hogaanku shaqaaleeyey dad aan hore ururka waxba ugu qabanin, balse taageeradoodu ay ku salaysnayd taageero qabiil. Waxaana meesha laga saaray dadkii hore ururka uga soo shaqayn jiray oo iyagu u arkayey in ayna ururka u galin qabiil ee u galay mabadda,a.

Arinta xawliga ah ee uu ururku ku socday, waxay qaar badan oo ururka ah u arkayeen in ayna ahayn astaan fiican oo keeni karta guul wakhtiga dheer, balse ay tahay arin kacaan milatari oo aragti dhaw leh, kana leexday arimihii aas aaska halganka.

Xiligii la gaadhay isticmaalo sharciga ururka, waxaa uu hogaanku jeclaystay in uu xukunka sii joogo [man of the job], isga oo leh hadii aan guul keenay ma jiraan wax kale oo loo baahan yahay, aragtidaas oo lid ku ah sharciga Jwxo.

Dadka aan siyaasiyiinta ahayn amaba iyagu danaha gaarka ah ururka ugu jira, waxay isaga qaateen in sharciga uu hogaanku ka wacan yahay. Jabhada Wadniga Xoreynta Ogadeeniya iyo Madaxdeedu in yar mooyee waxay garan waayeen in sharcigu uu wax walba ka wayn yahay, sidaasina waxaa ku bilowday guux khilaaf keenay.

Qaybta 1aad

Khilaafka Horseeday Dhimashada iyo Xoggaha aan la Ogayn een Baadhida ku Helay.

1.0 Khilaafka JWXO

Khilaafka ururka Jwxo dhexyaalay ayaa imbadan qarsoodi ahaa oo ay ogaayeen kaliya xubnaha ururka iyo taageerayaalkooda. Waxaana sida la sheego asal u ahaa qabyaalad iyo nin jeclaysi, ka bilaabatay Maxamed Cabdi Yaasiin [Diirane] oo uu Maxamed Cumar Cismaan doonay in si aan sharci ahayn uu xilka Jaaliyaadka uga qaado oo uu xiligaas hayey. Arintan waxaa dabada ka riixayey labo nin oo markaas qardaynayey jidkii ay Dr. Dolal ku gaadhi lahaayeen, Dr. Dolal waxaa uu Maxamed Cumar isku afdhaafeen xil ka qaadid uu doonayey in uu Diirane xilka kaga qaado, kobtaasina waxaa ka bilowday xurguf siyaasadeed oo ka bilaabatay Diirane xilkiina lagama qaadin. Xiligaasi Maxamed Cumar Cismaan waxaa uu ku jiray xil kordhin labo sano ah 2002 - 2004.

Intii ayna dhamaanin muddo kordhintaas ayaa waxaa kale oo soo baxday in Maxamed Cumar iyo Cabdulahi Yusuf u kulmeen si qarsoodi ah, oo uusan ururku Ogayn. Kulanka oo ahaa in Cabdulahi Yusuf u kala dabqaado Itobiya iyo Admiralka. Sidda la cadeeyey dhawr goor oo dambe ayey si qarsoodi ah u kulmeen Cabdulahi Yuusuf oo uu waraaqo ugu soo dhiibay Meles Zenawi. Cabulahi Yuusuf waxaa uu sheegay in Maxamed Cumar uu ku yidhi “awood ma lihi oo waxaa igu hareeraysan ragg ururka iiga soo horeeyey oo isku reer ah, waxaanan raadinayaa sidii aan u kala diri lahaa” [xigasho Cabdulahi Yusuf Axmed M/weynihii Somaliya].

Hadaba, kolkii ugu horeysay ee uu khilaafka ururku soo if baxay waxay masuuliyiinta ururku isugu tageen dalka Eritariya 2005, waxaana mar labaad Maxamed Cumar Cisman loogu daray hal sano in uu xilka sii hayo, waxaa kale oo goobtaas lagu dhisay gudi qaban qaabisa shir weynaha ururka. Saddex bilood ka dib waxaa uu gudoomiyuhu wax ka badalay gudigii loo magacaabay in ay qaban qaabiyaan shir weynaha ururka, iyada oo aanay jirin cid ka wada hadashay. Sannadkii 2005, waxaa uu ku dhamaaday iyada oo aan wax talaabo ah loo qaadin diyaarintii shirweynaha ururka.

1.1 Iskudaygii Dil ee Ugu Horeeyey

Dr. Dolal iyo ragii ay kolaasi isku aragtida ay ahaayeen oo ay ka mid ahaayeen; Salahdin Cabdiraxman Macow, Maxamed Cabdi Yaasiin [Macalin Diirane], Cabdiraxmaan Maadey, Cabdulahi Mukhtaar, Aadan Yusuf Taani, Khaalisa Ugaas Mahad, Sulub Cali Cabaas, Maxamed Wali Cabaas iyo xubno kale oo badan. Xubnahan oo ku kala sugnaa dibada iyo gudaha dalka, ayaa waxay ku heshiiyeen madaama uu gudigii shirweynaha Maxamed Cumar wax ka badalay oo aanay jirin wax la qabtay, ayey Dr. Maxamed Siraad Dolal madaama uu xidhiidh fiican la lahaa madaxda dalalka geeska Afrika qaarkood ay ku heshiiyeen in uu aado geeska Afrika soona diyaariyo goobtii shir weynaha ururka lagu qaban lahaa sidaasina waxaa qabay inta badan xubnaha ururka.

Dr. Dolal waxaa uu socdaal ugu kicitimay June 2006, dalalka Jabuuti, Sudaan, Kenya, Somaliya iyo Eritariya, **wuxuuna u sii gudbay gudaha Ogadeeniya si uu u war galiyo madaxda gudaha joogta iyo ciidanka ururka jwxo.**

Waxaa bishii August 2006, Maxamed Cumar Cismaan oo kolkaasi joogay xarunta gudaha ee Ogadeeniya uu maqlay in uu Dr.Dolal soo galayo gudaha uuna ku soo fool leeyahay xarunta ururka Jwxo oo ahayd Zone Qoraxeey.

Intii ayna soo gaadhin Dr. Dolal iyo ragii la socday, Gudoomiyihii xiligaas Maxamed Cumar Cismaan iyo koox hormuud ka ahaa Cadani, waxay qoreen warqad ay ku sheegeen in xilalkii laggaga qaaday Dr. Dolal xubno uu ka mid ahaa, **isla markaasna waxaa uu Maxamed Cumar ciidanka jwxo ee uu isagu kolkaas la joogay ku amray in ay toogtaan Dr. Dolal hadii ay arkaan,** sababta oo ah waxaa uu xidhiidh la yeeshay Itobiya wuxuuna doonayaa in uu is dhiibo.

Ciidankii amarka lagu siiyey in ay dilaan, ayaa amarka Eebe uu Dolal ku soo baxay, way naxeen, waayo way garanayeen wax uu yahay Dr. Maxamed Siraad Dolal, qaar ka mid ahaa ciidanka ayaa qiirooday oo qarin waayey dhagarta loo maleegay mujaahidka.

Ciidanku waxay u sheegeen Dr. Dolal, wixii uu Admiral Maxamed Cumar ku amray iyaga oo aqoonsaday xumaanta jirta. Dr. Dolal warbixin ayuu ciidanka siiyey wuxuuna u sheegay in aanay jirin wax fal ah in aanay ku samaynin shakhsi u dhashay dhulka Somalida Ogadeeniya cadowgooduna uu yahay nacabka Tigreega ee uusan jirin cadow kale.
Gudiga baadhista dilkii Dr. Dolal arintan waxay ka dhex heleen markii ay wararka uruurinayeen, horayse uma ogayn in ay arintani hore ugu dhacday Dr. Dolal intii uu noolaana ma uusan ku sheegin meel fagaaro ah, balse warka waxaa soo gaadhsiiyey dadka noo sheegay ciidankii amarka lagu siiyey in ay dambigan galaan.

Xil ka qaadista xubno badan oo ururka ka mid ahaa waxay cirka gaysay oo banaanka yimid khilaafkii ururka oo noqday dad yar oo la socda Maxamed Cumar iyo cududda ururka oo la safnaa Maxamed Siraad Dolal.

1.2 Shirkii Xalinta Khilaafka Ururka iyo Khiyaanadii Saaxiibadda

Waxaa dalka Denmark ka dhacday sheekadii ugu foosha xumayd ee ururka, waxay ahayd in ururka khilaafkiisa lagu xaliyo shirkaas. Waxaa shirka codsaday Diirane, Maadeey iyo Cabdulahi Mukhtaar iyo Khalisa Ugaas Mahad, Maxamed Cumarna wuu ka yeelay. Laakiin maamulkiisa iyo maal galintiisa waxaa lahaa Maxamed Cumar oo ay garab Istaagtay Xawaalada Kaah [Mustafe, Dubai]. Waxaa la kireeyey Hoteel Dalxiis muddo saddex maalmood oo jiif iyo cuntaba ah, waxaana ku baxday US$20,000.
Waxaana loo ogolaaday shirka ragii kale oo dhan marka laga reebo Dr. Dolal iyo Salaxudin. Waxayna saaxiibadood oo ay wada deganaayeen guriga Muxumed Cabdi Adar [Ilkacase] balan ugu qaadeen in ay dhamaynayaan khilaafka oo ay dhankooda yihiin. Shirka waxaa fadhiyey rag uu Dr. Dolal dhiigiisa u shubay iyo kuwo ay dhareer wadaag ahaayeen [waligaa ruux ku aaminay ha khayaamin xitaa cadowggaaga]. Dhamaadkii shirkaas waxaa ka soo baxay wax dan u ah guud ahaan ururka.

Waxana la go,aansaday sida la yidhi in guddi maxkamad ah la saaro, wax walba oo dhacayna laga dhigo xalay dhalay iyo wax aan dhicin. Guddiga Maxkamadeed ee la

sameyeyna ay soo saaraan bayaan baabi,inaya wax kasta iyo in saddex bilood gudahood uu ku dhaco shir weynihii ururku [saddexda bilood ururka dhexdiisu M Cumar uma aqoonsanayaan gudoomiye, Ideecadahase uu u sheegan karaa]. Waxayna sheekadii ku dhamaatay in gafkii ugu weynaa ay galeen dadkii la islahaa ururka ayey ugu daacadsan yihiin dadkaas oo aan isleenahay waxay yihiin dadkii wadada u xaadhay dilka Dr. Dolal. Maxkamadii loo sameeyey sidii lalahaa xalinta khilaafka ayaa waxay la safatay dhinac, sidaasina waxaa ku xidhantay sheekadii khilaaf xalinta. Ugu dambayntii ururkii Jwxo waxaa uu yeeshay labo garab bishii July 2007.

1.3 Iskudaygii Dilkii Labaad ee Dr. Dolal

Bishii September 2008, Dr. Maxamed Siraad Dolal oo ahaa gudoomiyaha golaha sare ee ururka Onlf iyo Salahdin Cabdiramaan Xaaji Macow oo ahaa ku xigeenkiisa, waxay socdaal shaqo ku aadeen dalalka geeska Afrika.

Waxaa ka mid ahaa dalka Kenya dalalkii ay socdaalka ku marayeen, hadaba intii ay joogeen dalka Kenya ayey soo booqdeen xeryo qaxooti oo ay ku jiraan dad ka soo cararay Ogadeeniya oo qaxootinimo halkaasi ku jooga.

Waxayna waftigu tageen xerada qaxootiga ee Xagardheere, waxayna halkaasi kula kulmeen dadweyne shacab ah iyo xubno masuuliyiin ciidan Jwxo ah oo ku dhibaataysan halkaasi. Xubnahaas ciidan sida naloo sheegay waxaa halganka ka soo caydhiyey Maxamed Cumar Cismaan, kolkii ay su,aalo ka keeneen khilaafka ururka Jwxo madaxdiisa u dhaxeeya in la xaliyo, ciidankani waxay u badan yihiin ciidamadii Jwxo ee gabalada Nogbeed.

Ciidamada Jwxo ayaa waftiga ku soo dhaweeyey xerada Xagardheere, waxaana martida la seexiyey guri. Hadaba xili habeen ah ayaa iyaga oo hurda guri ka mid ah guryaha ay lee yihiin dadka qaxootiga ahi, ayaa **waxaa weerar ku soo qaaday waftiga dad ku hubaysan Bastoolado iyo Tooriyo dadkaas oo ku guulaysan waayey in ay waxyeelo u gaysataan Dr. Dolal iyo Salaxudin.**
Kooxada werarka soo qaaday qaarkood oo la qabtay, ayaa waxaa watay nin la yidhaahdo Kamas dhabar, waxaana lagu xidhay saldhig Boolis oo ku yaala xerada qaxootiga [warqadii obiga waa la hayaa]. Markii la maraanmaray waxay sheegeen in uu soo diray Maxamed Cumar Cismaan iyo Cadaani Hirmooge.
Eedaysanayaalka ayaa kolkii dambe lagu siidaayey damiin, waftiga ayaa waxay ka codsadeen dadweynaha in la cafiyo. Sida naloo sheegay Kamas Dhamar, kolkii dambe waxaa lagu sheegay in uu ka qayb galay dagaalkii ka dhacay Calibuulay oo u dhaw degmada Dhoobley oo u dhaxeeyey Onlf garabka Maxamed Cumar Cismaan iyo Maamulka Islaamiga ah ee ka arimiya Jubada hoose.

Qaybta 2aad Sheegashadii

2.0 Dilkii Dr. Dolal, Sheegidii Ina Illey iyo Shakigii ka Dhashay

Isla habeenkii uu Telefeshinka Itobiya sheegay in Dr. Dolal la dilay, aroornimadii waxaa lagu soo qoray tacsi bogga Internetka ee **Ogaden.com,** boggan sida qaalibka ah ma qoro wararka farxad galiya cadowga Itobiya, waxaana uu wax u qoraa garabka Onlf Maxamed Cumar Cismaan. Qorida tacsida ee tafatiraha bogga Ogaden.com

waxay u ekay in loo xaqiijiyey dhimashada Dr. Dolal sida dhiiranaanta leh ee uu u soo bandhigay qoraalka.

Dadweynaha Somalida Ogadeeniya waxay u haysteen in boggani uu ku hadlo afka ururka Onlf, waxayna aad uga naxeen sida farxada leh ee uu kolkiiba u rumaystay warka cadowga. Waxaana aad uga xumaaday dadweynaha Somalida Ogadeeniya, waxaana laga codsaday in ay ka saaraan tacsida geerida aan la hubin hadii ay hubaana in ay sheegaan, kolkii uu arkay tafatiraha Ogaden.com sida ay dadku uga xun yihiin falka uu ku dhaqaaqay ayuu ka saaray tacsidii [Maxamed Xassan].

2.1 Kalsooni Daridii iyo Tilmaantii Bogga Internetka Ogaden.com
Bogga Ogaden.com oo isagu dagaalka Dr.Dolal bilaabay waa hore, kana xayuubiyey qolka kaydka ee bogga waraysiyadii iyo sawiradii Dolal, ayey dad badani sheegeen in uusan ahayn bogg Jabhadeed ee uu yahay bogg u shaqeeya Maxamed Cumar Cismaan, qoraaga bogguna si aad ah ayuu ula socday arimaha.

Dharaartii labaad ayuu bogga **Ogaden.com** soo qoray ciwaan ah; **Ma dhabaa in Maxamed Siraad Dolaal la dilay!!**. Dharaartii saddaxaadna waxaa ciwaankii naftigiisii iyo maykii Dr. Maxamed Siraad Dolal la soo dhigay bogga **eegga.com**!!. Waxaanu dib baadhid ugu noqonay erayada la isticmaalay iyo kalsooni darida bogga. Waxaa hoos loo xansaday Cabdi Maxamed Cumar, oo la weydiiyey in uu tusoy lafihii Dr. Dolal dadkii la dhashay si ay ugu samraan, wuxuuna sheegay in uusan ogayn cid dishay iyo meel lagu xabaalay toona, laakiin la I soo gaadhsiiyey kaliya qalabkiisii. Waxaa la weydiiyey xageed ka keentay sawirka, wuxuuna yidhi wuxuu ii sheegay wiilka bogga Eegga.com wax ku qora in uu ku helay sawirada iyo ciwaan kaba e-mail, mana uu garanayo cid soo siisay, kolkuu ii sheegayna waxaan idhi soo daa.

Waxa kaliya oo la ogaaday in e-mailka sawirada laga soo diray, uu yahay dalka Maraykanka kolkii dib loo baadhay saacada.

2.2 Dilka Dr. Dolal ETV, Ka Hore Dalalka Reer Galbeedka Waa Laga Oggaa

Xuuraan dheer ka dib, waxaan ka ogaanay dad ku sugan dalalka reer galbeedka, oo ah xubno iyo taageerayaal garabka Maxamed Cumar Cismaan in ay maqleen dhimashada Dr. Maxamed Siraad Dolal maalintii Sabtiga ahayd Janauary 17, 2009, laakiin waxaa ugu horeysay dadka caadiga 10:30 habeenimo saacada Afrikada Bari. Waxaa isweydiin leh yaa wargaliyey dadkan! Waxaan ka gaabsanaynaa in aan qorno magacyadda dadka sheegay in ay maqleen dhimashada Dr. Dolal.

Gabadh u dhaxday beesha maxamed Cumar Cismaan oo aan iyadu Ogadeen ahayn, ayaa laga soo xidgtay in ay maqashay in la dilay Dr. Dolal. Gabdhaas oo degan London waxay noo sheegtay in ay maqashay aroortii in la dilay ninkaas, waxayna diiday in ay sheegto ruuxii u sheegay .

Waxaa kale oo isagana laga maqlay nin xoog u taageera garabka Maxamed Cumar cismaan oo degan dalka Jarmalka. Wuxuu sheegay ninkaasi in uu Ogaa dhimashada Dolal 10 ka hore inta uusan sheegin TV Itobiya, waana uu diiday in uu sheego waxa uu maqlay, wuxuuna yidhi dhabtu mar bay iman anigase afkayga laga maqlimaayo sida ay wax u dhaceen.

Xaqiiqa waxaa ah, in laga ogaa dhimashada Dr. Dolal dalalka reer galbeedka iyo waliba cida dishay, waana lagu faraxsanaa dilkiisa sababo aan wali la cadaynin.

2.3 Dabaaldagii Taageerayaalka Maxamed Cumar iyo Daahfurkii Bogga Xaajo.com

Sida ay noo xaqiijiyeen dad badan oo ka mid dadweynaha Somalida Ogadeeniya markii ay maqleen geerida Dr. Dolal dad way ooyeen, waayo waxay u ooyeen wax qabadkii halgan ee uu soo galay iyo sidda aan loo haynin ruux badala kaalinkii uu halganka ku lahaa, dad badan oo Somaliyeed ayaa waxay la ooyeen oo kaliya, waxay u qaateen in ay burburtay Jabhadii ONLF, waayo isga ayey ku barteen ururka.

Dad wayne kale ayaa dabaaldagayey iyaga oo isku dayaya in ay ka qariyaan dadka Ooyaya waxa calooshooda ku jira, waxayna iloobeen mansabkii uu Dr. Dolal ku lahaa halganka Ogadeeniya waxa ay dooniba ha ka ahaatee way riyaaqayeen, waxayna u arkayeen in la dilay cadawogoodii 1aad.

Waxaan wali la garanin, wax ay dad taageera halganka Ogaden ugu farxeen dhimashada, halgamaa aqoon dheer leh, wax walbana u huray dalkiisa iyo dadkiisa.

Waxaa jiray wax dadkan dhagta loogu shubay oo been ah, balse kuwa dhaga dadka wax ku shubay waa kuwo aan daacad ka ahayn halganka, colaada ninkaas loo hayeyna ay ka xoog badisay dantii guud ee ummada.

Bogga Xaajo.com oo ah bogga ugu ballaadhan ee ay akhristaan somalida Ogadeeniya, ayaa soo daabacay “la kala baray cadow iyo nasteex, Dr. Dolala waa nool yahay”.

2.4 Taariikhda Dr. Dolal Waxaa leh Dalka iyo Dadka Somalida Ogadeeniya

Dr. Dolal waxaa uu ahaa nin qadyadeed magaciisa marka laga reebo qoyska reer Dolal, waxaa leh dalka iyo dadka Somalida Ogadeniya oo ku jira halgan ay ku doonayaan in ay xaqooda ku soo dhacsadaan.
Hadaba, kolkii ay cadaatay dhimashada Mujaahid Dolal waxaa munaasab ahayd in warbaahinta Somalida Ogadeeniya iyo dadka halganka ku jiraa ay sheegaan kumuu ahaa Dr. Maxamed Siraad Dolal iyo wax qabadkiisii halgan. Taariikhda halgamaagu waa sharfta ummada iyo dhaxalka jiilasha dambe.
Waxaa wax lala yaabo iyo qaadan waa wayn noqotay in ay afka xidheen, xubnaha ururka ONLF oo uu ka mid ahaa sheegtana in ay u dagaalamaan xaqa ummada Somalida Ogadeeniya.!! Waxaa la isweydiiyey muxuu yahay halganka ay sheeganayaan kolka ay xaqirayaan xaqa geesiga ka baxay ummada Ogadeeniya, waxayna dad badani rumaysteen in ay ku farxeen geerida Dr. Dolal oo shaki weyn keentay in ay lug wayn ku lee yihiin dilkiisa [Xashaa lilaahiye nin libin kaa xistiyey xumihii hayn waaye]. Arintan xaqiraada ayaa waxay keentay in dad badani ay dhabarka u duwaan halganka, kolba hadii ayna jirin isu nax iyo isku qiimayn qofku waxa uu qabto.

2.5 Maxaay Ciidamada Itobiya Maydka Dr. Dolal u Soo Dhigi Waayeen Magaalooyinka?

Sida caadadda ah, ciidamada Itobiya haddii ay dilaan xubnaha ururka Jamhada Wadaniga Xoreynta Ogadeeniya [Jwxo] iyo taageerayaashaba, waxay maykooda soo dhigaan magaalooyinka ugu dhaw meesha uu dilku ka dhaco. Waxaana xaqiiq ah hadii ay Dr. Dolal maykiisa heli lahaayeen in ay soo dhigi lahaayeen magaalada ugu dhaw meesha uu dilku ka dhacay si ay u niyad jabiyaan shacabka.

Waxaa wax lala yaabo ah, lama arag mayka Dr. Dolal meel la soo dhigay oo magaalo ah, mana jiro ruux arkay maydkiisa, taas badalkeeda waxaa markhaati ahaan loo soo dhigay maykiisa, si aan sharci ahayn bogga internetka ee **eegga.com**, oo kolkiiba laga saaray.
Ciidamada degaanka ee ka hawlgala aagga la sheegay in lagu dilay Dr. Dolal waxay sheegeen in ayna ka warhaynin in la dilay iyo in kale ninkaas. Hadaba yaa dilay Dr. Dolal?

2.6 Marin Habaabintii Bogga Ogaden.com

Kolkii ay soo baxeen shakiga ah in aan la garanaynin cida dishay iyo sidii loo dilay Dr. Dolal, lana doon doonayo dadkii ka dambeeyey dilka Dr. Dolal, ayaa waxaa warsaxaafadeed af Ingriis ah uu soo qoray bogga Ogaden.com. waxayna ku faahfaahiyeen sidii loo dilay Dr. Dolal, waxayna qoreen sidan; Dolal iyo afar nin oo la socota oo doonayey in ay dalka ka soo baxaan, ayaa waxaa qabtay ciidamada milatariga Itobiya ee sidda gaarka ah loo tababaray. Markay qabteena jeebabkooda ayey baadheen waxayna ka heleen aqoonsiyo aqoonsigiina waxay u direen Qabridahare waxaana loo soo cadeeyey in uu yahay Dr. Dolal, halkaas ayeyna ku dileen Dr. Dolal iyo ragii la socday.

Waxaan shaki ku jirin in hadii ay ciidamada Itobiya qaban lahaayeen oo ay aqoonsan lahaayeen in ayna dileen ee ay xabisi lahaayeen, si ay xog uga helaan. Xitaa haddii ay heli lahaayeen maydkiisa in ay qaadan lahaayeen, ka dibna ay wadhi lahaayeen badhtanka magaalada Qabridahare. [Hashu maankaygii gadaye ma masaar bay liqday].

Warsaxaafadeedkaas laguma qorin bogga ay aadka u wada shaqeeyaan ee Qorahey.com, oo sida la sheegay aad uga xumaaday sida ay wax u dhaceen iyo qoraalada Ogaden.com. Waxaana muddo door ah uu bogga qorahey.com la safnaa, boggaga aadka uga xumaaday dilkii Dr. Dolal.
Wadaha bogga ogaden.com, waxaa noo suurto gali weyday in aan helo, waxa uu kala socdo arintaas, wuxuuna muujiyey in uusan jeclayn in uu arintaas ka hadlo.

Qaybta 3aad Cadaymaha

3.0 Maxaa ka Run ah in Garabka Maxamed Cumar Cismaan ay Dileen Dr. Dolal

Garabka Maxamed Cumar Cisman kolkii ay Ogaadeen in uu Dr. Dolal u sii jeeddo gudaha dhulka Somalida Ogadeeniya lana kulmay madax dalka Kenya ah, ayaa waxay soo saareen warsaxaafadeed bishii November 01/11/08. Waxayna warsaxaafadeedka ku sheegeen in Dr. Maxamed Siraad Dolal uu lacag ka qaatay Safaarda Itobiya ee dalka Kenya lacagtaas oo uu doonayo in uu dadka ku qaybiyo.

Waxaa kale oo ay warsaxaafadeedka ku sheegeen in uu Dr. Dolal la kulmay Janaraal Gabre oo ah Janan Itobiyan ah madaxna ka ah ciidamada Itobiya ee jooga koonfurta Somaliya. Waxayna si aan munaasab ahayn wax ugagga sheegeen shakhsiyadda Dr. Dolal warsaxaafadeedka waxaa lagu qoray Ogaden.com.

Waxaa Isweydiin leh sidda ay dad masuuliyiin ah warsaxaafadeed aan sal lahayn ay ugu bandhigeen shacabka. Arintaas waxaa loo arkay in ay ahayd xalaalaysi dilka Dr. Dolal oo ay doonayeen in ay dilaan, hadii uu wakhtigu u saamaxo. Waxaa muuqata in colaada ay u qabeen Dr. Dolal ay ka tanbadisay!

3.1 Dr. Dolal Ma Qarinin in Maxamed Cumar Rag uu Xushay Dilayaan

November 24, 2008 waxaa la weeraray Dr. Dolal iyo xubno jabhadeed oo la socday waxayna dileen afar xubnood. Waxaa kale oo ay weerareen ciidanka Jabhada Xoreynta Somali Galbeed oo ay ka dileen naftood hurayaal qaali ah.

Laga bilaabo November 24, 2009 ilaa iyo January 17, 2009 Dr. Dolal iyo ciidankii la socday waxaa werar ku hayey ciidan gaar ah oo ka amar qaata garabka Maxamed Cumar Cisman, waxayna werar ku qaadeen in ka badan 12 goor oo mar uu soo gaadhay dhaawac fudud, ugu dambayntiina waa la dilay.

Garabka Maxamed Cumar Cisman, waxay isku dhabar jabiyeen in ay dilaan Dr. Maxamed Siraad Dolal tan iyo intii uu galay Ogadeeniya. Waxaa la helay warar ay isu marinayeen Internetka oo ay ku sheegayaan in la dilo oo madaxiisa la keeno [xaajo.com].

Waxay dileen ku xigeenkii Dolal, oo la odhan jiray Jamal Cali Odol [Jamal-dheere] oo ay gawraceen. Jamal dheer, Dr. Dolal waxay iska raaceen dalka Kenya. Jamaal wuxuu ahaa Sarkaal Sare oo ka tirsan Ciidanka xoogga dalka Ogadenia, wuxuuna dagaalka toos ugu jiray 12 sano, 1996 -2009. Jamaal dheere, waxaa hortii dagaalka ku dhintay laba walaalihiis ah, oo isaga ka weynaa, oo la kala odhan jiray Allaha unaxariistee Makhtal Faarax Odol iyo Shiine Faarax Odol. Hadaba Jamaal waxaa xabad ku dhuftay nin reer Haaruun ah oo la yidhaahdo Cabdulaahi Gaab, maantana nool oo jooga. Waxaa magaalada Garloogube tagay 4 nin, oo ahaa ehelkii Jamaal, waxayna halkaa kula kulmeen Ciidan markaas ONLF sheeganayey oo ay weydiiyeen sababta loo dilay Jamaal iyo 2 nin oo la socotay. Nasiibdaro 4tii nin halkii ayaa lagu toogtay, waxaana ku jiray wiil 16 jir ah oo Iskuulka Qabridahare fasax ka ahaa. Jamaal Agoontii uu ka tagay waxay maanta ku rafaadsan yihiin xeradda IFFO ee qaxootiga dalka Kenya. Markaa gabagabadii, cadaynta hadaan qaadano qeybta muuqata ee isheenu arki karto ma shaki baa ku jira cidda dishay Dr.Dolal. Waxaa dilay ninkii dilay Jamaal oo ay isku aragti iyo isku ciidan iyo jabhadba ahaa yeen. Taasi waa cadaynta qeybta ugu fudud ee baadhitaan madoontada ah

Waxaa kale oo aan la ogayn in garabka Maxamed Cumar oo dhan ay heshiis ku ahaayeen in la dilo Dr. Dolal iyo in rag gaar ahi ay doonayeen in ay dilaan.

Dr. Mujaahid Maxamed Siraad Dolal, waxaa uu si markhaati ma doon ah afkiisa si caalami ah uga sheegay in garabka Maxamed Cumar Cismaan ay doonayaan in ay dilaan sababtana uusan garanaynin. Waxaa uu yidhi “waxaan u malaynayaa in ay

gumaysiga u shaqaynayaan, hadii ayna sidaasi ahayna ma ayna ku dhiiradeen in ay aniga iyo xubnaha kale ee jabhada ay damcaan in ay dilaan".

Dr. Dolal labadii waraysi ee ugu dambeeyey ee uu siiyey Ideecada BBC-da iyo VOA-da 14/01/09, waxay ahaayeen cadaymo markhaati ma doon ah, arimihii uu sheegayna waxay u dhaceen sidii uu u sheegay.

Dacwadihii uu u sheegay sida caalamiga ah, dhinaca ka soo horjeedaa marna ma ayna ka hadlin sidaas daraadeedna waxay isku fureen markhaati ah in ay doonayeen in ay dilaan Dr.Dolal iyo dadka la socdaba. Waxaa ka hadlay dilka Dr.Dolal si uusan garanaynin Maadey oo yidhi "bal Dolal ha sii jooga Ogadeeniya".

3.2 Galidii Ogadeeniya ee Maxamed Cumar, Waxay Keentay Dilkii Dr. Dolal

Maxamed Cumar Cismaan iyo rag kale oo la socda ayaa waxay gurmad ahaan uga yimaadeen Eritariya waxayna gudaha Ogadeeniya u galeen si ay u xoojiyaan weerarada la doonayey in lagu dilo Dr. Dolal iyo Naftood hurayaalka la socday. Toban maalmood ka dibna galidii gudaha ee Maxamed Cumar Cismaan, waxaa la dilay Dr. Maxamed Siraad Dolal.

Warar xog ayaa sheegay in kolkii uu galay Maxamed Cumar Cismaan, isla markiiba uu kulan kula qaatay rag ciidanka Jwxo ah oo ay isku reer yihiin. Kulankaas khaaska ah, waxaa ka cadhooday xubno ay Dr. Dolal isku reer ahaayeen oo kolkii dambe soo gaadhay dalka Somaliya. Wuxuu sheegay xubinkaasi in Maxamed Cumar xidhiidh la sameeyey ciidan aanan garanaynin, labo maalmood ka dibna waxaa uu xushay ciidan afar madax ah, oo uu saddex madax u diray aaga Qoraxey iyo Godey oo Dr. Dolal ku sugnaa, hal madaxna aaga Nogob oo ay ku sugnaaye ciidan raacsanaa Dr. Dolal.

Waxaa ay ciidamada Tigray soo dhigeen Magaalada Qabridhare Afar Helekobtor oo kuwa dagaalka ee ay ciidamadu isticmaalaan, waxayna bilaabeen in ay baadhaan halka uu ka baxayo signalka thorrya Dr. Dolal.
Weerarka lagu hayey Dr. Dolal kaliya ma ayna ahayn Ciidanka Jwxo, ee kuwa Tigreeguna waxaa ay raadsanayeen Dr. Dolal iyo raga la socday.

Waxaan suurto gal ahayn sinaba u ahayn, in Maxamed Cumar Cismaana in aan wax weerar ah lagu qaadin marna, Dr. Dolal iyo ciidankii la socdayna ay isu bad badalaan laba ciidan oo cadow iyaga laftigoodu isu ah.

Maxamed Ismaciil oo isga oo jooga Menneapolis la waydiiyey Dr. Dolal ayaa hogaaminaya ciidamada ONLF ee gudaha ku jira, waxaa uu ku jawaabay laba todobaad noo qabta in uu Dr. Dolal halkaas sii joogo iyo in kale. Dhimashadii Dr. Dolal ayey dadku is weydiiyeen wax buu ogaa Maxamed Ismaaciil kolkii uu lahaa laba todobaad noo qabta.
Cabdiraxmaan Sheekh Maadey oo isna waraysi siiyey ideecada VOA, ayaa waxaa uu ku hanjabay "Dr. Dolal halkaa in yar ha sii joogo", wariyaha ayaa yidhi miyaad hanjabaysaa.

Cabdiqaadir Hirmooge oo joogay Denmark ayaa waxaa uu meel faagaare ah ka yidhi "waanu dilaynaa kana soo bixi mayo dalka Dr. Dolal sidaas ogaada".

Qaybta 4aad Cadaymo iyo cidii ka qayb gashay
4.0 Qayladii Dr. Dolal iyo Qaadan Waagii Ummada Somaliyeed

Maxamed Faarax Caydiid Eebe ha u naxariisto, waxaa waraysi la yeelatay ideecada VOA sanadkii 1995, waxaa la waydiiyey su,aal ah Caydiidow waxaad ka badbaaday isku dayo dil oo badan, waxaa lagu balan qaaday in cidii ku disha la siin lacag badan, Maraykanku waxaba wuu kaa qaadi waayey, hadaba yaad u malaynaysaa in ay ku dili karto?.
Janaraal caydiid isaga oo aan ka fiirsan ayuu si sahala uga jawaabay wuxuuna yidhi "waxaa idili kara dadkayga", ciidanka sirta ee Maraykanku shaqo dambe ma ayna qabanin labo bilood ka dibna Caydiid Ina adeerkii ayaa dilay.

Taas bil cagsigeed Dolal iyo dadweynaha Somalida Ogadeeniya marna maskaxdooda kuma soo dhicin Dr. Maxamed Siraad Dolal, waxaa dili xubin u dhaartay Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeeniya [Jwxo], ama ah Somalida Ogadeeniya iyo Somali midna.

Waxaana qaadasho waa ku noqotay guud ahaan ummada Somaliyeed markii uu Ideecaha ka sheegay Dr. Maxamed Sirad Dolal in lagu hayo weerar la doonayo in la dili isaga iyo xubno ONLF ah. Dameeri isku halayn bay hooyadeed dabada uga nuugtaa, hadii la ogaan lahaa arimaha khaldan ee ay ku dhiiranayaan qaar ka mid ah Madaxda ururka ONLF, waxaan filayaa in uusan Dr. Dolal ku geeriyoodeen gacan Jwxo.

Waxaa uu dadweynaha Somalida Ogadeeniya hal mar dhagaha ku maqlay in halgankii ay mudada dheer soo wadeen uu jiho kale qaatay,

4.1 Yaa Weerarka ku Qaadayey Dr. Dolal

Dr. Dolal iyo ciidankii la socday oo ay ujeedadoodu ahayd in ay la dagaalamaan ciidamada gumaysiga Itobiya, ayaa waxaa dagaal uuna marnaba ka filaynin kala hor yimid xubno ka mid ah Jwxo oo ka amar qaata Maxamed Cumar oo ay hore Dr. Dolal dhinaca siyaasada si wayn isugu hayeen.

"Ciidankii uu Dolal watay maalin kaliya colaad lagama daynin isaga iyo ciidanka uu watayna waxay ku jireen difaac werar labo dhinac oo kaga imanayey Itobiya iyo xagga Maxamed Cumar Cismaan" sidaasina waxaa yidhi AFDAYL oo ka mid ahaa waftigii uu Dr. Dolal u diray gabalada Nogbeed.

Ciidankii uu Dolal la socday waxay meelo badan uga baxeen colaad sokeeye darteed iyo cadow taageerayey oo ahaa ciidanka garabka Maxamed Cumar iyo ciidamada Itobiya.

Dr. Dolal, waxaa soo gaadhay dhaawac fudud oo ah sinta, maalmo ka hor intii aan la dilin, waxaana gaystay dhaawaca ciidamadan Jwxo ee garabka Maxamed Cumar Cismaan.

Dr. Dolal waxaa uu Ideecahadaha si aan qarsoodi lahayn uga sheegay in la doonayo in la dilo isaga iyo N/hurayaalka la socdaba. Waxaana markhaati ah shacabka Somaliyeed in Dr. Dolal ay dileen xubno Jwxo ah oo ka amarqaata Maxamed Cumar

iyo raga la safka ah, sidaasina waxaa qaba [Wariyeyaalka labada Ideecadood VOA, BBC iyo siyaasiyiin badan oo Somali ah].

4.2 Dadkii ka Qaybqaatay iyo Sida uu u Dhacay Dilkii Dr. Dolal

Sida aanu ku helay baadhitaanka, waxaa ka qaybqaata dilka Dr. Dolal, qaybo door ah oo ka mid ah dadweynaha Somalida Ogadeeniya, qayb ah ciidanka Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogadeeniya iyo masuuliyiin xubno ka ah Jabhada. Sababta kaliya ee aanu helay in ay ugu dhiiradaan dilka Doctorka iyo ragii la socday ayaa ah mid aan la sharxi karin ayna ugu muhiimsan tahay arin qabyaaladeed oo foolxun iyo masayr. Waxaa la xaqiijiyey in la dabo socday tan iyo intii uu soo gaadhay dalka Kenya, lana raadinayey in la helo isaga ama dad tiro yar oo la dhinta, si loo waayo markhaati cadeeya cida dishay Dr. Dolal.

A] Dhinaca dadweynaha; sida la cadeeyey waxaa Dr. Dolal xidhiidh la sameeyey nin Dubai degan oo u shaqeeya Xawaalada Kaah magaciisana la yidhi Cabdala Af waranle. Cabdale Af Waranle xidhiidh fiican kama dhaxaynin Dr. Dolal, balse waxaa uu xidhiidh wanaagsan oo reernimo uu ka dhaxeeyey Maxamed Cumar Cismaan, kolkii ugu horeysay ee uu la hadlo Dr. Dolal waxaa uu kala hadlay Nairobi Oct 2008, waxaana uu u sheegay in ayna hada Maxamed Cumar Xidhiidh wanaagsan lahayn. Sida ay tustay cadaymo aan ka helay shirkadii lahayd Satelite-ka Telefooni [Thuray] uu Dr. Dolal watay, Cabdale Afwaranle waxaa uu ahaa Telefoonka ugu badnaa ee la hadli jiray Dr. Dolal ilaa iyo maalintii la dilay, umana tacsiyeyn ilmaha Dr.Dola. Inta la ogg yahay muddo saddex goor ah ayuu Cabdala Af Waranle Dr. Dolal telefoonka lacag ugu shubay [Dolal waxaa laga sheegay in la yidhi ninka had iyo goor kula soo hadlaya ee aan wax macno leh kuu sheegaynin waa maxay, Dolal waxaa uu yidhi “hadii la I dilo Ina Af waranle magtayda ha laga qaado”, hadalkan waxaa laga soo xigtay madax sare oo Somali Galbeed iyo xubno Jwxo ah, magaca warbin gaar ah ayaa lagu xusi doonaa].

B] Qaybta Ciidanka Jwxo; Maxamed Cumar axaa uu gudaha la galay ciidan u badan beel oo ka soo raacay Eritariya, 10 maalmood markii uu gudaha ku jiray Dolal waa la dilay. Maxamed Cumar waxaa uu xulay saddex madax oo ciidan ah tiradoodana 75 xubnood, madax walbana waxaa uu madax uga dhigay nin beeshiisa ah;

- Cabdiraxman Daarweyn 25 ciidan u badan beel, Baarguun, Elale iyo Dhanaan
- Daa,uus waxaa uu isna watay 25 Ciidan beel, Gabagabo iyo Aaga Qabridahare
- Muxumed Amiin oo isna watay 25 Ciidan isku jir ah, waxaa loo diray Nogob

Horimahan waxaa amarka siinayey Maxamed Cumar Cismaan, waxaana uu amar ku siiyey in la dilo Dr. Dolal, waayo waxaa uu la socdaa ciidanka [New Police]. Way adkayd in xoog lagu muquuniyo isaga iyo ciidankii la socday ee Jwxo, in kasta oo dagaalo marar badan lagu soo qaaday, waxaa ay ogaadeen in ayna kaga guulaysan karin dagaal in si xeeladaysan loo dilo mooyee.

C] Masuuliyiin ururka Jwxo; arinta dilka Dr. Dolal waxaa si gaar ah u fuliyey Maxamed Cumar Cisman, waxaa kale lug weyn ku lahaa Maxamed Ismaaciil, Cabdiqadir Hirmooge Cadaani iyo Cabdiraxman Sheekh Maadeey. Waxaa iyana ka qayb qaatay dilka Sulub Cabdi Axmed iyo wiil uu abti u yahay Maxamed Cumar oo magaciisa la yidhaahdo Cabdi Cabdulahi.

Hanaankii lagu dilay; Dr. Dolal ciidankii la socday, waxaa ay xigeen dhinaca cadowga, waxaana uu la hadlay reer ree miyi ah oo deganaa Baarguun isaga iyo Madax uu ka mid ahaa Axmed Nashaad wayna kala tageen markiiba, waayo waxaa Dolal la balansanaa Dhabuuke Ceelaabe oo sida la sheegay isu muujinayey nin waanwaan wada. Hadaba Dolal iyo saddex wiil oo gaadh ah oo fadhiya, ayaa waxaa xabad meel gaaban kaga furay rag dhawra oo uu watay Khadar Daarweyn, saddexdii wiil markiiba xabada ayaa la tagtay Dr. Dolal dhaawac ayaa caloosha ka gaadhay. Waxaa naloo sheegay in ay damceen in ay waraystaan, wuuna diiday waxaana Afkiisa ka soo baxday **"Walee Idinkuna igama dambaysaan"**. Intaas kolkii uu yidhi waxaa Madax xabada kaga dhuftay Khadar Daarweyn. "Lacag ayey jeebkiisa kala baxeen, sawir ayey ka qaadeen qalabkii uu watayna way qaateen, waxayna noo sheegeen in aan xabaalo" sidaas waxaa yidhi Maxamed Dhagaqool, degaanka Baarguun, oo ka mid ahaa reerka ree miyiga ah ee xabaalay Dr. Dolal. Waxaanu ka gaabsanay in aanu qoro, goobta lagu xabaala iyo Cida xabaashay Dr.Dolal, sababo amaan awgood.

Ciidankani waxay labisnaayeen sida na loo sheegay dirays la mid ah ka Booliska degaanka wayna timo xiiraayeen, reerka warka nasiiyey waxay yidhaahdeen markii ay Dr. Dolal iyo ragii la socday sidaas nooga baxeen ayey kuwanina na soo galeen kolkay in yar naga maqnaayeena waxaanu maqalay xabad.

[Warkan waxaa na soo siiyey rag laga diray tuulooyinka ka tirsan Qoraxeey, oo in muddo ah raadinayey goobtii, cidii, sidii iyo waliba meesha lagu xabaalay, waxayna xaqiijiyeen afartaas arimood oo dhab ah].

4.3 Sidee Booliska Degaanku ku Heleen Qalabka DR. Dolal oo uu ka Maqan Yahay Telefoonki Thuraya [satellite phone]?

Waxaa la cadeeyey in Qalabkii uu watay Dr. Maxamed Sirad Dolal oo dhan marka laga reebo Telefoonkii Satelaytka [Thuray] ay galeen gacanta qaar ka mid ah madaxda Booliska Cusub ee Degaanka. Labada dhinac ee dagaalka iskaga soo horjeeda waa dad wada dhashay wayna wada shaqayn karaan hadii ay is fahmaan.

Waxaa ay sheegeen warar xog ah oo aan ka helay Waqooyiga Maraykanka, Ismaamulka Somalida, Kenya iyo Somaliya in markii uu dhacay dilku, ay ku adkaatay ragii ka dambeeyey dilka in ay dadweynuhu maqlaan, in nin halgamaa ah, oo caan ah ayey ONLF gacanteeda ku dishay.
Waxaana la raadiyey wadadii lagu dhababi lahaa, waxaana arintaas dhameeyey Maxamed Ismaciil Cumar oo xiligaas joogay dalka Maraykanka. Waxaana uu ku taliyey Maxamed Ismaciil Cumar arimahan hoose;

- In aan Maydka Dr.Dolal Itobiya loo dhiibin, waayo war ayaa soo bixi kara
- In ay reer Miyigu aasaan waa arinta ugu sirta badan [dhababid]
- In Madaxada Maamulka Kilalka 5aad ay sheegtaan dilka loona xaqiijiyo
- In Qalabaka iyo Sawirada Dr.Dolal loo gacan galiyo Madaxada Maamulka Kilalka 5aad
- In Boggaga Internetka Kilalka 5aad loo diro sawirka Mayka Dr. Dolal

Arimahani waxaa ay noqon karaan kuwo ay dadku rumaystaan in Dr. Dolal ay Dileen Booliska Cusub ee Kilalku.

In kasta oo hadaad xaqa dad is tidhaahdo, ay adag tahay in uu xaqu qarsoomo, waxaana arimahan xaqiijiyey dadkii la farayey in ay arimahan sameeyaan intooda nool.

Waana sidaas sida dhabta ah ee ay booliska Kilalku ku heleen Maydka Dr. Maxamed Siraad Dolal.

Gabagabo
5. Gabo Gabadda Warbaahinta Gudiga Baadhista Dilkii Dr. Maxamed Siraad Dolal.

Gudiga baadhista ee dilkii Dr. Dolal oo kharash iyo wakhti badan galiyey sidii ay ku helilahaayeen wararka ku saabsan sidii uu u dhacay dilka iyo cidii dishay, ayaa waxaa u suurto gashay in ay soo ururiso warar badan, waxaana u soo baxday arimihii ay baadhayeen.

Gudigu waxay aad isaga ilaalisay in ay ay soo galiso cid aan shaqo ku lahayn arimaha dhacay, iyada oo ilaalinaysa cadaalada.
Waxaa kale oo ay gudigu ka fogaatay in ay abuurto arimo abuuri kara, dhibaato cadaalad la,aaneed.

Gudigu waxay ka hawl galeen meelo dalal badan oo ay ku badan yihiin dadweynah Ogadeeniya.

Gudiga waxaa ka mid ahaa, aqoon yahano, masuuliyiin Jabhadeed, odayaal isugu jira rag iyo haween.

Waxayna gudigu baadhistooda ku soo gabo gabeeyeen in dilkii Dr. Maxamed Siraad Dolaal ahaa kuwa u dhacay, si qarsoon [assaasionation], waxaanan helay, anaga oo aad u taxa darayna arimahan hoose;

- Dr. Dolal waxaa ay colaad siyaasadeed dhex tiilay qaar ka mid ah madaxda ay isku ururka yihiin, lamase filayn gacanqaad dil ah.
- Dr. Dolal dhawr goor oo hore ayaa la isku dayey in la dilo
- November 15, 2009 ayuu galay Dr. Dolal Ogadeeniya
- Dilka Dr. Dolal waxaa ka qayb qaatay, xooggag door ah oo is biirsaday
- 12 goor ayey ciidamo Onlf ahi weerar ku qaadeen Dr. Dolal
- January 6, 2009 M.C. Cismaan oo wata ciidan gurmad ah ayaa galaya Ogadeeniya
- Dr. Dolal, wuxuu cadeeyey [bbc iyo voa] in rag uu si gaar ah u diray M. C. Cismaan ay dilayaan January 15, 2009.
- Jamal Faarax Odol [Jamaal-dheere] oo ahaa ku xigeenkii Dr. Dolal, kana soo raacay Nairobi, waxaa dilay Cabdulahi gaab reer haaruun.
- M. C. Cismaan iyo xubnaha kale ma beenin arintaas, balse way hanjabeen.
- January 17, 2009, Dr. Dolal wuu shahiiday.
- Waxaan la helin Maydka Dr. Maxamed Sirad, caadada Tigray maydadka waxay soo dhigaan magaalooyinka, sida kuwii ONLF, ee ka dambeeyey Dr. Dolal
- Itobiya iyo Kilalka 5aad midkoodna kama warhayo waxa dhacay [si caalami ah ayey u sheegeen].

- Waxaa gudiga loo soo cadeeyey, meesha lagu xabaalay, cida xabaashay, dadka dilay Dr. Dolal iyo wixii ay u sheegeen dadka xabaalay.
- Madaxda Kilalka 5aad, waxay cadeeyeen in loo soo gudbiyey qalabkii uu watay Dr. Dolal oo uu ka maqan yahay Satellite phone [Thuraya].
- Waxaanu helay xubno ka mid ah kuwii amarka lagu siiyey in ay dilaan Dr. Dolal, waxayna cadeeyeen, kuwa ay yihiin ragii dilay Dr. Dolal.

Hadaba kolkii ay guddigu heshay arimahan iyo kuwa warbixinta ku jiray waxay go,aan satay in ay u soo ban dhigto dadweynaha Ogadeeniya sida wax u dhaceen iyo cidii ka dambaysay dilka Dr. Maxamed Siraad Dolal.
Warbixinta waxaa ka maqan, magacyada Markhaatiyada iyo beelaha ay ka soo jeedaan iyo waliba meesha ay degan yihiin. Waxaanan sidaas u samaynay anaga oo ilaalinayna cosiga markhaatiyaalka arima la xidhiidha amaankooda dartiis.

Waxaanu dib ka soo qori doonaa war bixinta oo kooban iyo talooyinka ay guddigu ka soo jeediyaan wax haboon laga sameeyo dilka qarsoon ee ay gaysteen xubno ka tirsan ururka Jwxo.

Gudiga Baadhista iyo Xaqiiqo Raadinta Dilkii Dr. Maxamed Sirad Dolal

gudigadolal@ymail.com